

Heshiiska La-taliyaha Caafimaadka Daryeelka Carruurta

Child Care Health Consultant Agreement

Iyada oo la raacayo Xeerka Maamulka Washington (WAC) 110-300-0275, adeeg-bixiyaha xarunta waxbarashada carruurta yaryar ee rukhsadda u haysta in uu daryeel **cunug yar kasta** waa in uu shaqaaleeyo ama la xiriiro la-taliyaha caafimaadka daryeelka carruurta si uu u bixiyo la-talin caafimaad si uu u taageero hab-dhaqannada shaqaalaha la shaqeeya carruurta yaryar iyo si uu u taageero baahiyada carruurta yaryar ee gaarka ah. Adeeg-bixiyaha xarunta waxbarashada carruurta yaryar waa in uu heshiis qoraal ah oo ay waaxdu oggolaatey oo loogu talagalay adeegyada la galaa la-taliyaha caafimaadka daryeelka carruurta.

Heshiiskan la-talinta wuxuu u dhaxeeyaa:

Barnaamijka Waxbarashada Carruurta Yaryar

Enter Name

Enter Contact Name

Enter Street Address

Enter City, State, Zip

Enter Phone

Enter Email

iyo

La-taliyaha Caafimaadka Daryeelka Carruurta

Enter Contact Name

Enter Street Address

Enter City, State, Zip

Enter Phone

Enter Email

Heshiiska:

Sida ku cad heshiiskan, la-taliyaha caafimaadka daryeelka carruurta wuxuu:

- Sameyn doonaa ugu yaraan hal booqasho oo goobta lagu tago bishiiba mar, haddii cunug yar la qoro, xilligaas oo la-taliyaha:
 - Indha-indhaynayo ka-dibna qiimeynayo aqoonta ay shaqaaluhu u leeyihiin caafimaadka carruurta yaryar, koritaanka, iyo amniga wuxuunna siinayaa taageero loo marinayo tababar, la-talin ama gudbin;
 - Indha-indhaynayo ka-dibna qiimeynayo hab-dhaqannada caafimaadka ee fasalka oo ay ku jiraan, balse aan ku koobneyn, xakameynta caabuqa, oo ay ku jiraan nadiifinta, fayodhowrka, iyo jeermis-dilidda, wuxuunna bixinayaa kaalmo farsamo oo lagu saxayo hab-dhaqanno kasta oo walaac laga qabo;
 - Indha-indhaynayo ka-dibna qiimeynayo dabecadda, koritaanka, iyo xaaladda caafimaadka ee carruurta yaryar ee daryeelka ku jira wuxuunna sameynayaa talooyin uu siinayo shaqaalaha ama waalidiinta ama mas'uuliyiinta oo ay ku jiraan haddii u-kuurgelid dheeraad ah lagu taliyay, sida loogu baahdo ama haddii kale si habboon loo go'aamiyay.

- Siinayo adeeg bixiyaha waxbarashada carruurta yaryar qoraal kooban, saxiixan oo taariikhsan booqasho kasta oo ka mid ah mowduucyada lagala hadley waalidiinta ama shaqaalaha, meelo kastoo walaac laga qabo oo la xiriira munaaqasho, u-fiirsasho, qiimeyn, ama natiijooyinka ka soo baxey baaritaanka.
- Ugu warbixinayo booqasho kasta Waaxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska (DCYF).
- La heli karo, ama diyaarin karo qof uu igmaday oo buuxiya shuruudo la midka ah kuwa la-taliyaha caafimaadka daryeelka carruurta sida hoos lagu qeexay, telefoon ahaan markii loo baahdo.

Saxiixyo:

Bixiyaha Waxbarashada Carruurta Yaryar

Taariikh

La-taliyaha Caafimaadka Daryeelka Carruurta

Taariikh

La-taliyaha caafimaadka daryeelka carruurta waa in uu noqdaa kalkaaliye diiwaangashan oo rukhsad-haysta kaas oo:

- Ka soo shaqeeyay caafimaadka carruurta ama caafimaadka guud shantii sano ee la soo dhaafey ama uu qaatey ama barey fasallo caafimaadka kalkaalinta carruurta heer kulleej ah shantii sano ee la soo dhaafey;
- Waayo-aragnimo u leh shuruudaha rukhsad-bixinta gobolka iyo caafimaadka guud; iyo
- Aqoon iyo waayo-aragnimo ku filan u leh bixinta adeeg waafaqsan awoodaha la-talinta caafimaadka ee lagu qeexay nuqulka ugu dambeeyay ee Daryeelidda Carruurteenna.

Waxaan caddeynayaa in aan aqoon iyo karti u leeyahay in aan u adeeggo la-taliye caafimaadka daryeelka carruurta ahaan oo ku saleysan shuruudaha kor lagu soo sheegay.

Saxiixa La-taliyaha Caafimaadka Daryeelka Carruurta

Taariikhda